

Dib u eegista diwaanada

Waa maxay Dib-u-eegista Diiwaanku?

Dib u eegista diiwaanku waa qayb ka mid ah goobaha daryeelka ilmaha ay dooran karaan inay dhaafaan Heerka Tayada Hagaajinta Waxbarashada 3 ee eegaya siyaasadaha iyo dhaqamada la xidhiidha Heerarka Tayada Hagaajinta Waxbarashada. Dib u eegista diiwaanka ayaa looga baahan yahay dhammaan goobaha bixiya Adeegyada Early Childhood Education and Assistance Program (Barnaamijka Caawinta iyo Waxbarashada Barbaarinta Caruurta, ECEAP). Marka ay goobuhu dhammeeyaan Xogta Barnaamijka iyo labada wareeg ee Muuqaalada Gaagaaban, waxay dooran karaan Dib-u-eegista Diiwaanka ee Heerarka Tayada ee ay hadda u hirgeliyaan carruurta iyo qoysaska.



Maxay muhiim u tahay dib u eegista diiwaanadu?

Heerarka Tayada ee ku jira Dib-u-eegista Diiwaanku waa hawlo lagu muujiyey inay taageeraan korriinka ilmaha. Barnaamijyada fulinaya hawlaha ayaa qaadaya tallaabooyin dheeri ah si ay u siiyaan adeegyo tayo sare leh carruurta iyo qoysaska. Qaybta dib u eegista diiwaanka, barnaamijyada waxaa loo aqoonsan yahay dadaalkan. Dib u eegista diiwaanadu waa fursad aqoonsi, milicsi, iyo koboc ku saabsan siyaasadaha iyo dhaqamada hadda la hirgaliyay ee barnaamijka sida wanaagsan u saameeya carruurta, shaqaalaha, iyo qoysaska/daryeelay bixiyaasha.

Maxaa dhacaya inta lagu jiro Dib u eegista Diiwaanada?

Dhammaan Heerarka Tayada ee loo soo gudbiyay Dib-u-eegista Diiwaanada waxaa dib loogu eegaa CECL (oo hore u ahaan jiray Saaxiibkii Tababarka). Tababarahaaga iyo U qaabilsanaha Bulshada ee Barashada Kobicinta ee Jaamacadda Washington ayaa diyaar u ah inay ka caawiyaan taageerada farsamada ee ku saabsan soo dejinta dhukumentiyada CECL.

- Barnaamijyada ka qaybqaatay Dib-u-eegista Diiwaanka ee hore, nidaamku wuu ka duwan yahay. Faylasha ilmaha dib looma eegi doono; taa beddelkeeda, waxaa si xooggan diiradda loo saaray siyaasadda.
- Caddaynta Dib-u-eegista Diiwaanku way kala duwan tahay iyadoo ku xidhan heerarka tayada. Shan ka mid ah Heerarka Tayada waxay u baahan yihiin caddaynta siyaasadda barnaamijkaaga iyo saddex ka mid ah Heerarka Tayada waxay eegaan dhukumentiga hawlahaaga.
 - Heerarka Tayada halkaas oo siyaasadda dib loo eego, ka qaybgalayaashu waxay soo gudbiyaan buug-gacmeedkooda qoyska, buug-gacmeedka shaqaalaha, iyo/ama buug-gacmeedka shirkadda si ay caddayn ugu noqoto hawlaha tayada ay u diyaariyeen inay ku taageeraan carruurta, qoysaska, iyo shaqaalaha.
 - Heerarka Tayada ee dhukumentiyada dib loo eego, way kala duwanaan doontaa. Waxaad macluumaad gaar ah ka heli kartaa Hagaha dib u eegista diiwaanka, kaas oo ku yaala CECL.



Heerarka tayada ee lagu daray Dib-u-eegista Diiwaanku waa:

- Baadhitaanada
- Hogaaminta Tilmaamta leh
- Qiimaynta Socota
- Ka hortagga Hakinta iyo Eryidda
- Shakhsiyaynta
- Xoojinta iyo Taageerida Qoysaska
- Manhajka
- Gudbitaanka

Maxaa dhacaya marka xigta?

Khabiirka Aqoonsiga Tayada ee ka socda Barashada Kobicinta ee Jaamacadda Washington ayaa dib u eegi doona dhukumentiyada la soo gudbiyay ee Dib-u-eegista Diiwaanka ee Heerarka kasta oo Tayada ah iyo shuruudaha uu ka qaybgaluhu doortay.

- Warbixin ayaa loo soo saaray ka qaybqaataha iyo tababaraha.
- Warbixinta waxaa loo isticmaali karaa horumarinta tayada joogtada ah.
- Ka qaybgalayaashu waxay ku hawlan yihiin wareeg tababar oo ku habboon baahiyahooda gaarka ah.



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

DCYF ma takoorto waxayna usiisaa helitaan siman barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda dhamaan dadka iyadoon loo tixgalin isirka, midabka, jinsiga, diinta, caqiidada, xaalada guur, dhalashada, rabitaanka galmo, da'da, xaalad ciidan ama jiritaanka naafo jidheed, dareen ama maskaxeed.

Haddii aad rabto nuqullo dhukumanti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (DCYF Xidhiidhiyaha Qaybaha Telefoonka) 1-800-723-4831 ama iimaylka communications@dcyf.wa.gov.

DCYF PUBLICATION EL_0074 SM (08-2023) Somali